

Sharci cusub oo yareyna isqaadsiinta

Hadda wuxuu baarlamaanka waddanka ansixiyay sharci khuseeya cudurka karoonaha (covid-19). Qofkii sharciga jebiya wuxuu mudanayaa ganaax ama goobta ganacsiga oo laga xiro. Sharcigan waaba dhaqan galay hadda.

Horey waxa hay'adda caafimaadka uga soo baxay talooyin badan. Sidaa ay tahayna cudurkii weli wuu sii kordhayaa, oo waa in waxkale la sameeyaa. Sidaa daraadeed ayaa xisbiyada ku jira baarlamaanka ogolaadeen sharciga cusub. Sharcigan wuxuu in badan uga egyahay talooyinkii horey u jiray. Wuxuu xakamaynayaa dukaamada iyo goobaha xafladaha. Haddii aan sharciga loo hogaansamin waa ganaax ama goobta oo la xiro. Waa in aaney is cadhiidhin jirin. Inyar oo dad ah baa markiiba geli kara dukaamada. Dukaamada boor ay ku qorantahay sida xaalku yahay ayeey ilbaabka ku dhejinayaan. Guddiga maamulka gobolka ayaa kontoroolaya raacidda sharciga.

8 qof oo keliya ayaa loo ogolyahay goobaha xafladaha.

Xafladaha qaaska ah ee ka dhaca goobaha ururada, meelaha la kiraysto, waxaa keliya oo joogi kara 8 qof. Meelo ka mid ah waddanka dad ayaa ka dhigtay xaflado waa weyn. Taas waxay keenaysaa fidi taanka cudurka. Haddaan sharciga la raacin, waxaa loola dhaqmayaa sida dukaamada oo kale. Guddiga maamulka gobolka wey ganaaxi karaan goobtana waa laga xirayaa.

Mas'uuliyad baa ku saaran

Adigana sidoo kale mas'uuliyad baa kaa saaran inaanu cudurku fidin. Iswiidhan sharciga cudurada faafa wuxuu leeyahay, qof walba waa inuu ka qaybqaataa inaanu cudurku fidin. Waxaa kaloo sharcigu leeyahay (qofkii ka shakisan inuu qabo cudur faafa) waa inuu sameeya si walba oo uu ku hakin karo ku fiditaanka dadka kale. Waana in is baaritan la sameeyaa. Haddaad cudur faafa qabto waa inaad caawisaa raad raaciisa. Sida adigoo sheegaya dadkaad la kulantay ee cudurkan qaadi kara.

Ilmaha dhigta dugsiyada dhexe guryaha ayeey waxbarashada kala soconayaan.

Inta badan degmooyinka gobolku waxay go'aansadeen in ardayda dugsiyada dhexe wax ku bartaan guriga. Emmaboda oo keliya ayaa go'aansatey iney si kale u xalliyaan. OO ilmuhu waqtiyo kala duwan guriga joogaan. Laakiin sida dugsiyada sare oo kale ardayda u baahan caawimaad dheeri ah iskuulka waa u furan yahay. La xiriir maamulka degmada ama iskuulka haddaad doonayso inaad ogaato sida xaalku yahay.

Dheeraad: Waa waqtiga ugu adag hay'adaha caafimaadka ee gobolka Kalmar.

Gobolka Kalmar waxaan hadda ku jirnaa waqti adag. Dad badan buu cudurkii ku dhacay, kuwa badan baa dhaqtarka jiifa oo welina cudurkii wuu sii fidayaa. Dadka u baahan in qalabka neefta lagu xiro waa ay bateen. Hadda gobolka wuxuu u baahanyahay goobo badan oo kale oo dadka lagu daaweeyo. ” U dhaqan sidii adigoo cudurkii qaba, qofkaad la kulanta kasoo qaad inuu cudurka qabo” Sidaa waxaa yiri Lisa Labbe' sandelin, oo ah dhakhtarka cudurada faafa ee gobolka Kalmar.

Dheeraad: Talaalkii waa uu ka bilowday gobolka

In ku dhow 4500 oo qof baa la talaalay gobolka. Inta badan waa dadka degan guryaha xanaanada ee gaarka ah, shaqaalahooda, dadka waaweyn ee guryaha loogu adeego iyo wixii la deggan. Waxaa kaloo la talaali doonaa shaqaalaha qaybta Covid-19-ka ka shaqeeya. Dawladda ayaa go'aamin doonta sida dadka intiisa kale loo talaali doono. Qorshaha dawladda wuxuu yahay in dadka wixii raba in la talaalo iney heli doonaan lixda bilood ee sanadka ugu horeysa. Hay'adda caafimaadka iyo gobolada waddanka waxa ay ku turjumi doonaan macluumaadka cudurka luqado dhowr ah. Majaladda *Maxaa ka cusub cudurka Corona* oo lagu soo qori doono sida ugu dhaqsaha badan.

Waa inaan adkaysanaa!



Macluumaadka cudurka Covid-19 oo ku qoran luqado badan.

Ku toosi kaamirada moobiilka kodka markaa waxaad geleysaa beyjka. Meeshaas oo aad ka heli doontid macluumaadka covid-19 oo ku qoran luqado kala duwan.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar



**Borgholms
kommun**